

**Degmada Iskuulada Aagga St. Cloud 742**  
**Xaqa u Lahaanshaha in la Codsado u Qalmitaanka/Shahaadooyinka Macallinka**

Iskuulka: \_\_\_\_\_

Taariikhda: \_\_\_\_\_

Iskuuladeena barnaamijyada Title I, Part A, waxay helaan lacagaha dawlada dhewe ee barnaamijyada qayb ka ah Xeerka Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (ESEA), oo wax laga beddelay 2015. Iyadoo taas lagu salaynayo, macalimiintu waa inay kasbadeen shahaadaynta iyo shatiga gobolka. Shahaadaynta iyo shatiga gobolku waxay taageertaa tababarka looga baahanyahay in la noqdo macalin.

St. Cloud Area School District 742 waxaa ku jira macalimiin badan iyo caawiyeeyasha fasalka oo aqoon iyo xirfado leh. Sida hoos timaada ESEA iyo Title I, waalidiintu waxay xaq u leeyihii inay cadsadaan macluumaadka ku saabsan shahaadooyinka xirfaddeed ee macallinka (macalimiinta) ama caawiyaha (caawiyeeyasha) waxbarashada fasalka. Caawiyaha waxbarashada fasalku waxa uu ardayda siiya tacliin ama taageero kale oo uu macallinku si toos ah u kormeerayo. Haddii aad cadsato macluumaadkan, degmada ama iskuulku waxay ku soo siin doonaan xaaladaha soo socda sida ugu dhakhsaha badan:

- Macallinku waxa uu buuxiyey shuruudaha shati-siinta gobolka ee heerkala fasallada iyo maaddooyinka uu macallinku wax ku baro;
- Haddii shuruudaha shahaadaynta gobolka laga dhaafay (aan looga baahnayn wakhtigan) macalinka xaalad degdeg ah ama xaalad kale oo ku meel gaar ah darteed;
- Macallinku waxa uu wax ka baraya aagga loo shahaadeeyey ama uu shatiga u haysto;
- In ilmahaagu ka helayo adeegyada caawiyasha waxbarashada fasalka iyo xirfada leeyihii caawiyasha waxbarashada fasalku

Shaqalaheena waxaa ka go'an in ay taageeraan waxbarashada, bulshaynta, iyo waxbarashada dareenka iyo koritaanka ee ilmahaaga.

Degmada waxaa ka go'an inay hubiso in dhammaan macalimiinteenya iyo Caawiyeyaasha Fasalku ay yihiin kuwo u qalma oo xirfad leh. Haddii aad jeelaan lahayd inaad cadsato macluumaadka ku saabsan u qalmitaanka macallinka ama caawiyeyaasha waxbarashada ilmahaaga sida kor ku xusan, fadlan kala xiriir Xafiiska Title I ee soo socda:

Title I Office, St. Cloud Area School District 742, 1201 2<sup>nd</sup> St. S., Waite Park, MN 56387

320-370-8000, Ext. 8095 (Xafiiska Title ayaa wuxuu la shaqayn doonaa Waaxda Shaqaalah ee Degmada. Iyaga oo ku matalaya adiga.) Fadlan ku bixi macluumaadka hoos:

|   |  |
|---|--|
| Magaca Ilmaha iyo Heerka Fasalka:   |  |
| Magaca<br>Waalidka(Waalidiinta)/Masuulka<br>Sharciga ah:                  |  |
| Saxeexa<br>Waalidka(Waalidiinta)/Masuulka<br>Sharciga ah:                 |  |
| Emailka iyo Taleefoonka<br>Waalidka(Waalidiinta)/Masuulka<br>Sharciga ah: |  |

Waad ku mahadsan tahay rabitaanka iyo ka qayb qaadashadaada waxbarashada ilmahaaga.

|                             |                         |         |
|-----------------------------|-------------------------|---------|
| ISTICMAALKA XAFIISKA KALIYA | Taariikhda La Qaybiyay: | Waaxda: |
| Aqoonsiga ardayga #:        |                         |         |